



Luulyo 2021

minority  
rights  
group  
international



## DIB-U-EEGIS BARASHO OO KU SAABSAN KA QAYBGALINTA GARGAARKA EE DADKA LAGA BADAN YAHAY EE WASAARADDA ARRIMAHAA DIBADDAA EE SWITZERLAND


### Barnaamijyada Geeska Afrika

Waxaa warbixtant loo dalbaday in la soo saaro si Waaxda Federaalka ee Wasaaradda Arrimaha Dibadda ee Switzerland ay awood ugu yeelato inay fahan wanaagsan ka qaadato saamaynta barnaamijyadeeda gargaarka ay ku leedahay bulshoonyinka ay jinsiyadahooda, diimahooda iyo luuqadahooda kala duwan yihiin ee qaybta ka ah dadyowga guud ee ku nool Geeska Afrika ee ka faa'iidaysanaya barnaamijyada gargaarka. Ballanqaadyada Yoolka 2030 ee Horumarka Waara ee 'Ciribirkira Saboolnimada, Takoorka iyo Sinnaan la'aanta' iyo 'Mudnaan-siinta Caawinta Dadka dib-u-dhacu Ragaadiy' waxay hoosta ka xarriiqueen, mabda' ahaan, in ka qayb-galinta gargaarka ay aad muhiim ugu tahay dad badan. Warbixtu waxay bixinaysaa tafaasiil suurtagalinalina in si fiican loo fahmo heerka hawlgalintu mabda'a "Ciribirkira Saboolnimada, Takoorka iyo Sinnaan la'aanta", iyada oo si gaar ah loo tixraacayo ka qaybgalinta gargaarka iyo faa'iidooyinka ay u leedahay dadka laga badan yahay ee leh jinsiyadaha, diimaha iyo luuqadaha kala duwan iyo kuwa uu saameeyey takoorka ku salaysan isirka marka laga hadlayo gargaarka ay maalgeliso Switzerland iyo gargaarka horumarka la xiriira.

Hay'ado badan oo ku sugan gobolka ayaa in muddo ah walaac ka muujinayay sinnaanta iyo ka qaybgalinta gargaarka ee dadka laga badan yahay, gaar ahaan marka la falanqeynayo Soomaaliya/Somaliland", ayaga oo walaacooda ku salaynayay (inta badan warbixinno aan xaqiqaada cilmii-baaris ku salaysayn) ee la xiriira cawaqaqibka aan ku talagalka ahayn ee ka dhasha gargaarka loogu talagalay kooxaha laga badan yahay, leexsiga gargaarka, ka qadinta gargaarka iyo tusaalayaal kale oo wali taagan oo la xiriira takoor iyo haybsoc. Warbixinnda soo bandhigaya in takoorku wali yahay mid aan badankiis waxba laga qaban (ama xataa uu ka sii darayo sidii hore) bulshoonyinka uu gargaarku lafdhabar u yahay dhqaalaahaa maxalliga ah, waxay horseedayaan su'aalo la xiriira in gargaarku, ugu yaraan qayb ahaan, uusan gaarayn yookill uga rabay ee ahaa ciribirkira saboolnimada, takoorka iyo sinnaan la'aanta ama uu qayb ahaan ama si firfircoor gacan uga gaysanayoo sii jiritaanka nidaamyadan aan habboonayn. Hase ahaatee, waxaan jirin xog xaqiqaada ku salaysan oo aan dood laga keeni karin, sidoo kalena waxaa jirtay diidmo xooggan oo ka dhan ah in la is-waydiyo su'aalo toos ah; xaqiqdii ilo badan waxay fikir ahaanba qabeen in waydiinta su'aalahaan oo kale ay talo xumo ahayd ama aysan suurtagal ahayn, isla markaasna aysan soo ururin karin macluumaad waxtar leh ama ay cawaqaqib xun ku yeelan karto kooxaha tirakoobka qaadaya ama dadka la waraysanayo.

Barnaamijyada gargaar ee dowladda Switzerland waxay daboolaan saddex gobol oo kala duwan: Soomaaliya/Somaliland, Gobolka Waqooyi-Bari Kenya iyo Gobolka Is-Maamulka Soomaalida ee Itoobiya. Inkastoo caqabado waa-wayn ay ka jiraan dhammaan gobolladan, daraasaddu waxay ku guulaysatay inay dib-u-eegis ku samayo sida gargaarka loo gaarsiiyay dadka loogu talagalay iyo sida dadka laga badan yahay looga qaybgaliyay gargaarka dhammaan saddexda goobood iyadoo il gaar ah lagu eegayay dadka laga badan yahay.

Ka heerka siyaasad-dejineed, daraasaddu waxay ogaatay in barnaamijyada Switzerland ay si joogto ah u lahaayeen tixraacyo ku saabsan ahmiyadda ka qaybgalinta gargaarka ee dadka laga badan yahay, kanina wuxuu ahaa mabda' xooggan oo la fal-galayay qorshaha xuquuqda aadanaha iyo waxyeello ha gaysan ee ku jiray dukumuntiyada badankood. Hase ahaatee, marka ay timaaddo hawlgalinta siyaasad-dejinta, ka qaybgalintu waxaa aalaaba lagu tarjumayay kooxaha "nugul" ama "la hayb sooco" ee aan si cad u qeexnayn (amabaan gabii ahaanba qeexnayn). Tixraacyada la xiriiray ka qaybgalintu, meelaha la faahfaahiyay isla markaasna la cayimay, waxaaa inta badan lagu soo koobayay jinsiga oo kali ah, iyadoo waxoogaa la is dul taagayay da'da (tusaale ahaan, dhallinyarada), balse aan wax xusid ah la siinayn dadka laxaadka la' ama jinsiyadda/heerka tiro yaraanta. Tusmayaasha meelo dhif ah ayay kala soocayn ka faa'iidaysystayaasha gargaarka/dadka xuquuqda u leh gargaarka, iyagoo aan sii dabagalin wax dhaafsiisan jinsiga, sidoo kalena nidaamyada dabagalka iyo qimaynta ma ahayn kuwo waydiinaya in xogta la sii kala shaandheeyay wax dhaafsiisan jinsiga, sidoo kalena lama samayn falanqeyn waafi ah oo ku saabsan saameynata gargaarku ku yeeshay xiriirka



awoodaha, awoodda dhaqaale ee deegaanka ama dib-u-eegis kale oo ballaaran oo iftiimin lahayd saameynata qaybgalinta la xiriiray ka qaybgalinta. Saameynata siyaasad-dejin kasta oo ay leedahay dowladda Switzerland, nidaamyad fulinta mashaariicda iyo dabagalka iyo qimaynta waxaa suurtagal ah inay saamayn ku yeeshan hay'adaha fulinaya mashaariicda, si gaar ahna Soomaaliya/Somaliland, arrintani ma aha mid sahlan, maaddaama inta badan mashaariicda maalgelintooda ka qaybqaadato Switzerland ay ku lug leeyihiin dhawr hay'adood, aalaabana hay'adaha Qaramada Midoobay ay ku fuliyaan nidaamyo degsan isla markaasna ilaa xad la bad-baddali karo.

Billowgaba, waxaa muhiim ah in la ogaado in natijooyinkeenna aanay sheegayn in gargaarka Switzerland ay bixiso uu ka waxtar yar yahay kuwa kale ee ay bixiyaaan dowladaha ayada la midka ah marka ay timaaddo caawinta dadka dib-u-dhacu ragaadiy; baise hababka awoodeed iyo ka saarista awoodeed iyo saamaynta gargaarka ee lagu ururiyay daraasaddan waxay la mid yihiin kuwo kale oo badan oo ay hay'adda u ololaysa xuquuqda dadka laga tirida badan ee MRG ay kala kulantay adduunka oo idil. Hase ahaatee, farqiga kali ah ee u dhaxxeeyaa Switzerland iyo deeq bixiye kasta oo kale waa in Switzerland ay ku dhiirratay inay oggolaato in lagu sameeyo baaristan xeelka-deher. Marka si gaar ah looga hadlao Soomaaliya/Somaliland, deeqaha Switzerland waxay inta badan ka mid yihiin deeqaha ay ururiyeen deeqbixiyayaasha kale, gunaanadka halkan lagu gaarana wuxuu khuseeyaa inta badan, haddiiba aanay dhammaantood ahayn, deeq-bixiyayaasha (marka kuwo gaar ah laga soo reebo oo ku xusan foomka Hay'adaha la xushay ee Caalamiga ah ee aan Dowliga ahayn iyo kuwa maxalliga ah ee aan Dowliga ahayn.

### SOOMAALIYA/SOMALILAND

Daraasadda laga fuliyay **Soomaaliya/Somaliland** waxay daaha ka qaadday duruufu ku gaar ah dadka laga badan yahay, kuwaas oo ka duwan kuwa ay qabeen dadweynaha caadiga ah:

- Dadka ku sugan deegaannada ay ku xooggan yihiin dadka laga badan yahay waxay wajahayeen **cunto-yari heerkeedu sareyo**.
- Sidaas oo ay tahay, ma aanay helayn gargaar cunto/lacag caddaan ah **ama tigidh cunto** si la mid ah dadka kale
- Waxay u badnaayeen kuwo qabanayay **hawlo muruqmaalnimo** ah
- Meelaha loo aqoonsaday inay yihiin dad ka faa'iidaysanaya gargaarka, **waxaa loo diiwaangeliy habab ka duwan sida loo qoro dadka kale**
- Waxay sheegayeen ilo mashaakilaad **kala duwan** oo haystay bulshadooda iyo **haliso amni** oo ka duwan kuwa ay sheegteen dadka kale
- Waxay **xogahooda** ka helayeen ilo **kala duwan** (raadiyowga) isla markaasna **aad ayay u yarayd in lala tashado** ama inay ka qaybgalaan kulamada bulshada
- Jawaab-bixiyayaasha daraasadda ee ku sugnaa deegaannada dadka laga badan yahay **way** ku adkayd inay gartaan sida **cabasho** loo gudbiyo, **waxay sameeyeen cabashooyin** aan **badnay**, haddii ay sameeyeenaha **waxay u badnay** inaan la qadlin wax ficiil ah oo looga **falcelinayay cabashadooda**.
- Aad ayay u yarayd inay **dhigteen waxbarasho** dhaafsiisan dugsi sare
- Waxaa intaas ka sii muhiimsan, aqlabiyyadda ilaha oo idil (tusaale, aan ku koobnay dadka laga badan yahay) **waxay xaqiijiyeen** inay ka war qabeen **dhadooyin** gaar ah oo gargaar la leexsaday.
- Hase ahaatee, dadka ku noolaa deegaannada dadka laga tirida badan yahay waxay u badnayd inay lahaayeen telefoonka gacanta, kumana noolayn meel ka fog xarumaha aqoonta, caafimaadka iyo nadaafadda.

\*Warbixinta idin ahaanteeda waxay qoraayaashu adeegsadeen Soomaaliya/Somaliland oo ka dhigan labada aag oo la isku qabtay, haba kala sheegtaan maamullada Muqdisho iyo Hargeysa. Tani kama dhigna inaan aqoonsi bixinayno.



## WAQOOGI BARI KENYA

Gobolka **Waqooyi Bari Kenya**, gargaarka ay bixiso dowladda Switzerland wuxuu guud ahaan waxtar u leeyahay dadweynaha laga badan yahay ee ku nool gobollada, isla markaasna la kulma haybsoc marka laga hadlayso Kenya guud ahaanteeda. Gargaarka ay bixiso dowladda Switzerland wuxuu durbaba gaarayaad dadka laga badan yahay iyo kuwa dib-u-dhacu ragaadiyay. Hase ahaatee, daraasaddu waxay ka shishe martay heerkaas si ay dib-u-eegis ugu sameysa waayaa aragnimada dadka tiradooda sii yar tahay ee ku dhex nool aagga la bartilmaameedsanay (oo ay ku wada nool yihiin qabaa'ilka awoodda leh, kuwa laga badan yahay iyo kuwa ku sii dhex nool kuwa laga badan yahay). Kuwan danbe,

- Xubnaha bulshooyinka laga badan yahay waxay kala bar ahaan u muuqdeen inay isku waafaqsan yihiin in dhammaan dadka ku nool deegaankooda loola dhaqmo si isku mid ah si la mid ah bulshooyinka deegaanka ku xooggan, balse waxay tiro ka badan shan jeer sheegayeen in gargaarka aan laga qaybgalintu kooxaha laga badan yahay.
- Waxay sheegeen in tiro yar lala tashday isla markaasna aanaay si fican uga warqabin hababka falcelinta ka faa'iidaystayaasha gargaarka, waxayna lahaayeen ikhtiyaar ka duwan ee bixinta falcelinta.
- Deegaannada dadka laga badan yahay iyo hal tusaale oo kale, 4 ka mid ah 10-kii jawaab-bixiyayaalba waxay sheegeen inay ka war qabaan dhacdo gargaar lagu leexsaday. Hal ka mid ah shantii jawaab-celiyayaal kasta oo ka mid ah bulshada ku xooggan deeganka ayaa sidoo kale sheegay arrintan.

## SHAXDA KA QAYBGALINTA/KA QAYBGALIN LA'AANTA GARGAARKA EE KOOXHA LAGA BADAN YAHAY

NATIIJOYINKA DARAASADDA EE LA XUSHAY

Dadka laga Badan yahay Nidaamka Deegaan Dejinta  
Xerada Qaxootiga Bulshada Martigeliyayaasha



Aragtida jawaab-celiyayaasha ee ku aaddan ka qaybgalinta gargaarka ee dadka laga badan yahay waxaa lagu qiimeeyey labo heer: heerka dhammaan dadka oo idil ee ku dhex jira bulshooyinka loola macaamillo si siman iyo heerka kooxaha laga badan yahay loogu duro gargaarka. Labada xaaladoodba, kooxaha laga badan yahay iyo nidaamka deegaan dejinta waxay u badnayd inay dareemayeen in laga tagay.

### ARAGTIDA LAGA HAYSTO HAB-DHAQAN ISKU MID AH



### KA QAYBGALINTA XAL-RAADINTA




### KA QAYBGALINTA DADKA LAGA BADAN YAHAY HIRGELINTA MASHRUUCA K-RAPID

#### KU LUG LAHAANSHABA QORSHABA GARGAARKA


Ku luglahaanshaha xaddidan waxaa inta ugu badan loo aaneeyey dhaqaale yarida xaddidaysa baaxadda daraasad rasmi ah, iyo sidoo kale xaddidnaanta wacyigelinta bulshada faa'iidaystayaasha dhexdeeda ah ee ku saabsan waddooyinka furan ee xirir lagu samayn karo

#### Heer yar & heer aad u yar



#### HABABKA JAWAAB-CELINTA KA FAA'IIDAYSTAYAASHA GARGAARKA

Jawaab-celiyayaasha badankood, marka laga soo reebu kuwa ku jira xeryaha qaxootiga, waxay xaqijiyeen inay ka war qabaan hababka jawaab-celinta ee ay cabashooyinkooda ugu gudbin karaan fuliyayaasha gargaarka




#### SADDEXDA HABABKA JAWAABCELINTA EE UGU SARREYSA

- Taleefoon nambar
- Horjooge bulsho
- Booqasho qof ahaaneed waxay ku badan tahay kooxaha laga badan yahay iyo nidaamyada deegaan-dejinta

#### DHACDOOYINKA GARGAAR LEEXSIGA

Dhacdooyinka gargaar la leexsaday waxaa xaqijiyyah jawaab-celiyayaal tiradooda yar tahay balsle saami ahaan wayn, gaar ahaan kuwo ka tirsan bulshooyinka laga badan yahay iyo nidaamyada deegaan dejinta



Jawaab-celiyayaasha ka soo jeeda bulshooyinka laga badan yahay waxay u badnayd inay diidaan ka jawaabista su'aashan. Marka lala xiriiryo jawaabaha togan ee sare, tanii waxay caddayneysaa jirtaanka cabsi aargudasho ama cawaqb kale oo xun oo ay dadku ka qabeen haddii ay shaaciyaan aragtidooda ku aaddan su'aashan xasaasiga ah

## KOONFURTA ITOOBIYA

Gobolka Is-Maamulka Soomaalida ee **Itoobiya**, gargaarka ay bixiso Switzerland waxaa ka faa'iidaysta dadweyne ka tirsan dadka laga badan yahay isla markaasna la kulma haybsoc marka laga hadlayso xaaladda Itoobiya. Itoobiya gudaheeda, aqoon hore ayaa sheegaysa in bulshooyinka laga badan yahay ee ku dhex nool bulshooyin kale oo laga badan yahay ay qayb yar ka yihiin dadweynaha, isla markaasna uu yar yahay tilmaamaha ay ku soocan yihiin maaddaama ayaga laftooda ay afka Soomaaliga ku hadlaan. Habka loo fuliyay daraasadda waxtarkeedu wuu hoseeyay, balse daraasaddu, si kastaba ah ahaatee, waxay soo bandhigtay in kooxoda hirgelinta mashruuca ay la yimaadeen dadaal wayn si ay si habboon u diwaangeliyaan heerarka xaaladaha mushkiladaha horseeda iyo in gargaarka mashruuca loo jiheeyo meelaha loogu baahida badnaa.

### WACYIGELINTA HABABKA JAWAAB-CELINTA

Inkastoo natiijooyinka daraasadda ay guud ahaan ahaayeen kuwo togan, wacyiga hababka jawaab-celinta ee kooxaha laga badan yahay wuxuu ahaa mid hooseeyo.



Ayaa ka warqabtay

# TALOBIXINTA

MUDNAANTA	HAY'ADDA SDC & HAY'ADHA HORUMARINTA EE AHWADAAGTA LA AH	MAAMULLADA DEEGAANKA	HAY'ADHA CAALAMIGA/ KUWA FULIYAYAASHA AH
-----------	---	----------------------	--

## 1 Dhaqangeli ka Qaybgalinta ama Mabda'a "Ciribtirka Saboolnimada, Takoorka iyo Sinnaan la'aanta" oo ka yeel qodob laga heli karo dhammaan mashaariicda ay maalgeliso Switzerland

1.1	Dhaqangeli Tilmaamaha Cusub ee Natijjada la isku daray ee ku saabsan ka qaybgalinta, tusaale, astaanta ka tarjumaysa "Tirada dadka dib-u-dhacu ragaadiyay ee ka faa'iiday saneysa mashaariicda si loo yareeyo ka qaybgalin la'aanta, takoorka iyo sinnaan la'aanta"	Mudnaan Sare	✓	-	-
1.2	Dalbo kala soocid lagu sameeyo xogta dadka laga badan yahay marka la fulinayo mashaariicda (iyadoo taageero la siinayo hay'adaha bahwadaagta lala yahay si xal loogu helo ururinta xogta meelaha ay caqabab ka jirto)	Mudnaan Sare	✓	-	-
1.3	Dalbo qiimayn iyo tebin ku saabsan arrimaha guud ee sii daba dheeraynaya ka qaybgalin la'aanta dadka laga badan yahay mashaariicda gaargaarka iyo goobaha/meelaha laga hirgelinayo mashaariicda	Mudnaan Dhexe	✓	-	-
1.4	Dalbo Khabuur/la taliye qaabilسان ka qaybgalinta dadka laga badan yahay ama dadka laga badan yahay ee ka firsan kooxaha Swizz iyo hay'adaha qaabilسان fulinta mashaariicda	Mudnaan Sare	✓		✓
1.5	Dhaqangeli in tixgelin la siijo ka qaybgalinta dadka laga badan yahay marka shaqaale loo qoranayo mashaariic gargaar	Mudnaan Dhexe	-	-	✓
1.6	Dib-u-eeg nidaamyada horey u jiray ee ku saabsan qiimaynta baahiyaha, qorista dadka ka faa'iidaystayaasha mashaariicda iyo xiriir la sameynta bulshada iyo sidoo kale nidaamka ka qaybgalinta dadka laga badan yahay. Meelaha caddaymo eex ah oo ka dhan ka qaybgalinta dadka laga badan yahay, lagu helo liisaska horey u jiray iyo nidaamyadii hore ee xulista, isticmaal habab kale oo ka duwan kuwii hore (tusaale, samee liisas cusub, adeegso habab badan oo aad dadkaas ku gaari karto)	Mudnaan Sare	-	✓	✓
1.7	Xooji nidaamyada horey u jiray ee jawaabcelinta si aad wax caadi ah uga dhiginti dhaqanka ka qaybgalinta dadka laga badan yahay. Waxaa arrintani lagu gaari karaa iyadoo la dhaqangeliyo isticmaalka nidaamyada jawaabcelinta ee sida sahlan ay u adeegsan karaan una heli karaan ka faa'iidayste kasta iyo kuwa aan mashruuca ka faa'iidaysan, balse u qalmay inay ka qaybaataan sida kuwa aan waxba qorin waxna akhrin, dadka la haybsoco, kuwa naafada ah, tusaale, kuwa arragga la', kuwa dhegaha la', kuwa jir ahaan u dhibaataysan iyo wixii la mid ah. Si wax-ku-ool ah u dhis kalsoonida bulshada laga badan yahay ay ku qabaan nidaamyada jawaabcelinta adiga oo la shaqeynaya hay'adaha aan dowliga ahayn ee ay hoggaamiyaan dadka laga badan yahay, adiga oo adeegsanaya luuqado iyo farriimo ku habboon dadka laga badan yahay	Mudnaan Sare	-	-	✓

## 2 Taageer dadaallada/hindisayaasha u abaabulan sidii ay ku dhalin lahaayeen caddaymo ku saabsan ka qaybgalinta iyo ka qaybgalin la'aanta dadka laga badan yahay

2.1	Maalgeeli daraasooyinka iyo cilmbaariista u diyaarsan sidii ay ku dhalin lahaayeen caddaymo la xiriira ka qaybgalinta iyo ka qaybgalin la'aanta dadka laga badan yahay	Mudnaan Sare	✓	✓	-
2.2	Adeegso saameynta dadka kale si aad u dalbato ololeyaal joogto ah oo xog ururin ah iyo tirakoob iyo xog ururin ku saabsan dadweynaha iyo kooxaha kala duwan ee ay ka samaysan yihiin si aad si horukac leh u horumarisid kala soocidda xogaha ee ku saabsan dadka laga badan yahay	Mudnaan Sare	✓		
2.3	Aqoonso oo iskaashi la samee hay'adaha aad isku aragtida tiihiin si loo maalgeeliyo ama loo fududeeyo cilmbaariista iyo xog-ururinta ku wajahan soo saarista caddaymo ku saabsan ka qaybgalinta iyo ka qaybgalin la'aanta dadka laga badan yahay (tusaale, dowladda, hay'adaha horumarka qaabilسان, ururrada bulshada rayidka, hay'adaha aan dowliga ahayn, ururrada qaabilسان bulshada, shirkadaha gaarka loo leeyahay iyo kuwa tacliinta)	Mudnaan Dhexe	✓	✓	-
2.4	Taageer dadaallada lagu sahaminayo qaabka su'aalah loo dhigi karo isla markaasna loo ururin karó xogta ku saabsan xuquuqda dadka laga badan yahay ee ka qaybgalinta gargaarka	Mudnaan Dhexe	✓	✓	✓
2.5	Taageer daraasooyinka waqaqiciga ah ee lagu baarayo dhacooyinka la xiriira leexsiga gargaarka iyo colaadaha yaryar ee ka qaybgalin la'aanta dadka laga badan yahay uu daba dheereeyo	Mudnaan Sare	✓	✓	-

## 3 Si qayaxan u taageer dadaallada cusub ee lagu dhimayo ka qaybgalin la'aanta, takoorka iyo sinnaan la'aanta

3.1	Dabakh habab bulshadu hormuud u tahay oo lagu fulinayo dadaallada ay horboodeyso bulshada laga badan yahay adiga oo la shaqeynaya nidaamyada bulsho ee horey u jiray, hay'adaha ay hormuudka u yihiin dadka laga badan yahay iyo dowladaha hoose	Mudnaan Sare	✓	-	✓
3.2	Kaliya adeegso habab go'aaminteedu ay leedahay xog-ururinta si loo hago qorshayaasha fulinta ee xalalka la doonayo in la hirgeliyo sida falangeynfa dhaqaalaha siyaasadda, xog-ururinta lagu sameeyo bulshada iyo xog-ururinta la fuliyo ka hor hirgelinayo mashaariicda, iwm	Mudnaan Sare	✓	-	✓

3.3	Si cad u naqshadee hannaan wada-xaajood oo oggolaanaya kulamo ay gaar u galayaan dadka laga badan yahay, kuwas oo laga qaybgalinayo hay'ad aan dowli ahayn oo ay hoggaamiyaan dadka laga badan yahay/u kuurgalayaal leh taariikh hufan	Mudnaan Sare	✓	✓	✓
3.4	Xalal-doonka waa in lagu daraa duruufaha qabii/bulsho/isir marka la gaaro qorshayaashooda lagu fulinayo dadaallada	Mudnaan Sare	✓	-	✓
3.5	Tijaabi isku day lagu tijaabinayo haddii wada-hadallada bulshada dheddooda ama wada-sheekeysiga lala yeesho u kuurgalayaasha iyo xubnaha bulshada ay wax ka baddali karaan xaaladda si wax caadi ah looga dhigo ka qaybgalinta dadka laga badan yahay ee u dhexeeya bulshooyinka/qabaa'ilka	Mudnaan Dhexe	✓	✓	✓

#### 4 | Taageer dadaallada lagu dhisayo karaanka ee ku aaddan in wax caadi ah laga dhigo ka qaybgalinta dadka laga badan yahay

4.1	U igmo hay'adaha ay hoggaamiyaan dadka laga badan yahay inay qiimayn ku sameeyaan baahida' karaan si loo aqoonsado meelaha ay ka jirto baahiyaha karaanka. Waa in ururradan laga soo xushaa dowladda, hay'adaha aan dowliga ahayn iyo hay'adaha bulshada	Mudnaan Sare	✓	-	✓
4.2	Taageer dadaallada lagu dhisayo karaanka si loo horumariyo awoodda ururrada ay hoggaamiyaan dadka laga badan yahay ee qaba baahiyaha karaan. Karaan-dhisiddu waa inay diiraadda saartaa tababarka Horumarinta Hay'adda iyo Xoojinta Nidaamyada, kaas oo uu jiro: Horumarinta hay'adda, hoggaanka iyo xukunka, maamulka iyo maareynta shaqaalaha, maareynta mashaariicda, isku-xirkha iyo ololaynta, maareynta aqoonta, joogtaynta hay'adaha bulshada iyo dabagalka iyo qiimeynata	Mudnaan Sare	✓	-	✓
4.3	Sii taageero maaaliyadeed hay'adaha aan dowliga ahayn ee maxalliga iyo kuwa bulshada ee ay hoggaamiyaan dadka laga badan yahay	Mudnaan Sare	✓	-	-

#### 5 | Si cad u bartilmaameedso goobaha dadka laga badan yahay ee aan laga qaybgalin mashaariicda ee Kenya, Itoobiya iyo Soomaaliya

5.1	Dalab daraasad laga sameeyo goobaha/deegaannada laga hirgelinayo mashaariicda SWISS si loo aqoonsado kala duwanaanshaha isir, diin iyo luuqad ee ka jira deegaannada, iyada oo ahmiyadda la saarayo goobaha iyo sidoo kale heerka uu la eg yahay ka qaybgalin la'aanta koox kasta, deetana dukuminti garee duruufahooda gaarka ah iyo waxyaabaha ay la kulmeen	Mudnaan Dhexe	✓	✓	-
-----	--	---------------	---	---	---

#### 6 | Taageer hindisayaasha u ololaynta ee mas'uuliyiinta xilka haya lagula xisaabtamayo nidaamyada sharciyeed iyo siyaasad-dejin ee lagu horumarinayo ka qaybgalinta dadka laga badan yahay

6.1	Adiga oo la shaqeynaha dowladda, ka dhabee ballanqaadyada ku aaddan sidii loo xoojin lahaa nidaamyada sharcii, siyaasad-dejin iyo ballanqaadyada caalamiga ah ee ku aaddan in wax caadi ah laga dhigo ka qaybgalinta dadka laga badan yahay shaqada dowladda	Mudnaan Dhexe	✓	✓	✓
6.2	Dhis karaanka hay'adaha qaranka iyo kuwa maxalliga ah ee ay hoggaamiyaan dadka laga badan yahay si loogula xisaabtamoo dowladda qaranka iyo dowladaha hoose ballanqaadyadooda ku aaddan horumarinta ka qaybgalinta dadka laga badan yahay golayaasha deegaanka, qaranka, gobolka iyo kuwa caalamiga ah	Mudnaan Dhexe	✓	-	✓
6.3	Taageer oo kobci karaanka hay'adaha qaranka iyo kuwa deegaanka ee ay hoggaamiyaan dadka laga badan yahay si loo xoojiyo dadaallada u ololaynta ee ku wajahan dhaqangelinta nidaamyada sharcii ama siyaasad-dejinta horumarinaya ka qaybgalinta	Mudnaan Dhexe	✓	✓	✓
6.4	Si qeexan u taageer hay'adaha maxalliga ah ee ay hoggaamiyaan dadka laga badan yahay si looga dalbado dodo/wadahadallo ku saabsan sahaminta faa'iidda iyo faa'iido darrada horumarinta ka qaybgalinta dadka laga badan yahay	Mudnaan Dhexe	✓	✓	✓



Eeg lifaaqyada 4 & 5 ee daraasadda oo dhammaystiran, ee kor ku xusan, si talo bixin dheeraad ah looga bixiyo arrimo gaar ah oo ku saabsan isla xisaabtanka bulshooyinka ay dhibaatadu sameysay iyo Hay'adaha Saddexaad ee Dabagalka qaabilسان.